jaydess®

13.5 MG LEVONORGESTREL

Macluumaadka Bukaanka

Qalabkani waa Jaydess®

Waxaan rajeynaynaa in buug yarahani ka jawaabi doono su'aalaha aad qabtid iyo khuseymaha ku saabsan qalabka Jaydess®.

Muxuu yahay qalabka Jaydess®?

Jaydess® waa aalad gudaha qofka dumarka ah la geliyo oo ka kooban kiniini kaabsool ah oo hoormoon leh oo lagu soo dhejiyay fareem qaabka xarafka-T oo kale ah lagana sameeyay balaastig jilicsan oo la meer meerin karo. Aaladda dhererkeedu waa 30 mm waxaana la dhex dhigaa gudaha makaanka/maxalka dumarka iyadoo loo isticmaalayo qalabka gude dhige ah.

Jaydess® waa hoormoonka ugu yar ee 3 sano jir ah wareegsan lana heli karo isla markaana ka kooban kuuro hooseysa oo hoormoon ah. Ummulisadaada/dhakhtarkaaga ayaa guda u gelinaya aaladda makaankaaga/maxalkaaga, halkaa oo uu kaaga difaacayo uur qaadista aan loo baahnayn. Lyadoo si tartiib ah loogu sii deynayo kuuro hooseysa oo hoormoonka loo yaqaan (progestogen hormone levonorgestrel celcelis 6 micrograms) si goob ahaaneed makaanka gudihiisa, maalin walba ilaa 3 sannadood, lagaamana doonayo inaad ku sii fikiro maalin walba, toddobaad walba ama bil walba qaadasho ah.

Sidee ayaa Jaydess® u shaqeysaa?

Marka aaladda Jaydess® la dhex dhigo makaanka/maxalka qadar kuuro hooseysa oo ah hoormoonka levonorgestrel ayaa si tartiib ah u sii deysmaya isla markaana si talantaali ah ugu soconaya makaanka/maxalka hab maalinle ah, una difaacaya uur qaadista saddex wadiiqo.

1. Jaydess waxay ka dhigtaa dheecaanka balfisyada maxalka mid adag, sidaa darteed marinka shahwadu marto ayaa la xannibayaa.

2. Jaydess waxay saameyn ku yeelanaysaa hakinta koritaan ee cudurka kansarka ah ee ku dhaca hareeraha makaanka. Xuub dheecaaneedka wuxuu noqdaa mid siiban isla markaana aan bacrimis sameynaynin.

3. Aaladda lafteedu isla sidoo kale waxay kaalmeysaa saaxdda barabineed ee shahwada ku dhex jirta makaanka iyo marinnada fallopian loo yaqaan. Awoodda shahwaddu u leedahay inay ku gaadho ugxanta ayaa saameyn ku imanaysaa isla markaana bacriminta ayaa xannibanta.

Aaladda Jaydess® waxay u xannibtaa uur qaadista isu geynta waxyaabo dhawr ah.



Hoormoonka keliya ee ku dhex jira aaladda Jaydess® waa kan loo yaqaan levonorgestrel oo ah hoormoon la mid ah kan, progestogen ee caanka ku ah hoormoonnada kale ee looga hor tago dhalmada. Aaladda Jaydess® kama koobna kumana ay jiraan waxa loo yaqaan oestrogen.

Sidee ayey waxtar u leedahay aaladda Jaydess®?

Aaladda Jaydess® waa mid ka mid ah kuwa ugu waxtarka badan nidaamka dhalmo la dirirka. Aaladda Jaydess® boqolkiiba in ka badan 99% waxay wax uga tartaa uur qaadista laga bilaabo waqtiga makaanka la geliyo ilaa inta laga saarayo. Aaladda Jaydess® waxaa hawl galkeedu gaadhaa ilaa 3 sannadood.

Sidee ayaa hoormoonka loo yaqaan (levonorgestrel), ee ah hoormoonka ku dhex jira aaladda Jaydess®, saameyn ugu yeelanayaa jidhkayga?

Aaladda Jaydess® waxay inta badan ka hawl gashaa goob ahaan makaanka/maxalka. Waxay ku sii deysaa hoormoonka loo yaqaan (levonorgestre) makaanka gudihiisa isla markaana keliya xaddi yar oo hoormoonkaas ah ayaa raaca qulqulka dhiigga. Hoormoonka (Levonorgestrel) waa hoormoon si caadiyan ah loogu isticmaalo dhalmo ka-hortagga. Jaydess® saameyn waxyeello kuma keento hannaanka bacrin ahaaneed ee dumarka. Taana macnaheedu waxaa weeye in ugxan sideyaashu sii wadayaan soo saarista dheecaan ugxaneedka. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan lahannada ka dhasha marka la isticmaalayo aaladda Jaydess®, ka sii eego halka ugu hooseyasa ee qoraalka iyo buug yaraha la socda xirmada.

Maxay yihiin ujeeddada laga leeyahay miiqyo duneedka ku rakiban aaladda Jaydess®?

Miiqyada dunta ah ee ku rakiban aaladda Jaydess® halkaas ayey ku sugnaanayaan sidaa darteedna ummulisadaada/dhakhtarkaaga ayaa meesha ka soo siibi karaya. Ummulisadaada/dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi doona sida loo dareemayo miiqyada dunt ah ka dib markii aaladda meesha la geliyo. Markii aad dareentid miiqyada duntu inay kugu jiraan waxaad kala caddeyn kareysaa adiga laftaadu in aaladda Jaydess® ay weli ku sugan tahay meeshii saxda ahayd ee loogu talo galay inay kaga sugnaato makaanka, taas oo saamaxaysa ka hortagga xagga dhalmada ah oo waxtar leh. Wixii su'aalo dheeri ah oo ku saabsan miiqyada, haka daalin inaad kala sheekaysatid ummulisadaada/dhakhtarkaaga.

Maalinta kuugu horreysa ee lagugu xidho aaladda Jaydess®

Macluumaadka muhiimka ah ee ay tahay inaad la socotid ka hor intaan lagu gelinin aaladda Jaydess®

Sidee ayaa aaladda Jaydess® loo geliyaa makaanka?

Markii aad go'aan ku gaadho in lagu geliyo aaladda Jaydess®, waxaa lagugu xidhi karaa booqashada labaad ee aad ugu tegayso ummulisadaada/ dhakhtarkaaga. Markaas oo imtixaan aagga ilma galeenka laga qaadayo si sahlanna ay u gelin karaan ummulisada ama dhakhtarku aaladda Jaydess® makaankaaga iyadoo loo adeegysanayo geliye jilicsan. Ka dib aaladda Jaydess® markii meesha lagu xidho miiqyada dunta ah ee soo saara waxaa la gaadhsiin doonaa dherer gaaraya ilaa 2–3 senti-mitir.

Maxaan filan karaa ka dib markii aaladda la igu xidho?

Dumarka badankoodu waxay u arkaan in gelinta ay tahay mid iska sahlan, laakiin qaarkood ayaa dareemi karaya xanuun yar iyo jah wareer inta la gelinayo aaladda. Haddii uu ku qabto xanuun culus ama haddii xanuunku uusan kaa tegin toddobaadyo gudahood ka dib gelinta aaladda, waa inaad la xiriidhaa ummulisadaada/dhakhtarkaaga.

Sidee dhakhso leh ayey aaladda Jaydess® uga hor tegi doontaa uur qaadista?

Haddi; lagugu xidho aaladda Jaydess® 7 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta kuugu horreysa ee aad xaylka/caadadu ku haleesho Jaydess® waxay keenaysaa waxtar dhakhso leh oo ka hor imaanayaa uur qaadista isla markaana gaadhaya ilaa 3 sannadood. Haddii aaladda Jaydess® lagu gelinayo waqtiyada kale ee meertada caadadaada waa inaad is ilaalisaa adiga laftaadu adigoo sidoo kale isticmaalaya cinjirrada galmada ka hortagga loo isticmaalo 7 maalmood ee ugu horreysa. Waxaa talo lagu bixinayaa in la sugo 24 saac ka hor intaan galmada la sameynin ka dib gelinta aaladda Jaydess®.

Haddii lagugu xidho aaladda Jaydess® looma baahna in laga fikiro qaadashada kiniiniyada looga hortago dhalmada ee la qaato maalin walba, toddobaadlaha ama bishii kasta ah.

Miyaan ku taxnaanayaa ummulisa/dhakhtarka ka dib markii la igu xidho aaladda Jaydess®?

Ummulisadaada/dhakhtarkaaga ayaa go'aan ka gaadhi doona haddii aad u baahan tahay booqasho joogto ah iyo haddii kale ka dib markii aaladda lagugu xidho. Sidoo kale macluumaad ayaa lagaa siin doonaa haddii aad u baahan tahay inaad sameyso booqashooyin dheeraad ah.

Bisha kuugu horreysa ee aaladda Jaydess® kugu xiran tahay

Macluumaadka muhiimka ah ee ay tahay inaad la socotid ka hor intaan lagu gelinin aaladda Jaydess®

Ma jiraan sababo kale oo khasab ay tahay inaan ula xiriidho ummulisadayda/dhakhtarkayga?

Waa inaad la xiriidhaa ummulisadaada/dhakhtarkaaga haddii ay dhacaan mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:

- Markii uu ku qabto xanuun daran ama dhiig bax culus ka dib markii lagu geliyo aaladda ama haddii dhiig buxu uu sii socdo muddo ka badan 5 toddobaad.
- Markii aad ka shakido inaad uur leedahay.
- Markii uu ku hayo xanuun aan kaa tegaynin oo xagga ubucda ah, qandho ama dheecaan kaa imaanaya oo aan caadi ahayn.
- Markii adiga ama lammaanahaagu aad dareentaan xanuun ama xasil darro inta aad galmada sameynaysaan.
- Markii isbeddello ku yimaadaan hannaanka dhiigga caadadu u socdo (tusaale ahaan, haddii adhiigga caadadu yar yahay ama aadan helin wax caado ah ama durbadiiba uu noqdo mid jiitama ama goosta).
- Markii ay kugu yimaadaa dhibaatooyin kale oo caafimaad, sida dhan jabka/goon wareerka/madax wareerka daran, dhibaatooyin deg deg ah oo xagga aragtida ah, indha cudurka indha caseeyaha ama dhiig karka.

Waxyaabaha badan ee ay tahay inaad la socotid markii aad isticmaaleysid aaladda Jaydess®

Sidee ayaa aaladda Jaydess® saameyn ugu yeelan doontaa qaababka dhiigga caadadu u socdaan? Bil walba caadadu ma igu dhici doontaa?

Dhiigga caadadu qulqulkiisu wuu yaraan doonaa, labadaba xaddiga dhiig bixista iyo tirada inta maalmood ee aad dhiig baxdo bil walba. Saddexda ilaa lixda bilood ee ugu horreysa 3-6 bilood ka dib markii lagugu xidho aaladda Jaydess®, waxaa laga yaabaa inaad yeelatid dhibco dhibco dhiig ah ama dhiig bixis khafiif ah. Dumarka qaarkood waxay yeelan karaan dhiig bixis sii dheeraata ama culus inta lagu jiro muddadaan, laakiin taa macnaheedu maahan in maalin kasta aad dhiig bixi doontid. Waxaaba wanaagsan oo waxtar leh inaad qortid sida dhiiggu kaaga yimaado si aad u aragtid inuu ka soo raynayo maalin kasta oo timaadda (xusuus qor ayaa la socda kuna lifaaqan dhammaadka qoraalkaan).

Kala hadal ummulisadaada/dhakhtarkaaga haddii caadada dhiig bixisteedu ku sii socoto mid aad uga culus sidii caadiga ahayd ama haddii si dhakhso ah u dhiig baxayso maalmo ka badan sidii caadada kuu ahaan jirtay.

Dumarka qaarkiis, caadadu way ka luntaa gebi ahaanba markii ay isticmaalayaan aaladda Jaydess®. Haddii aanu kugu dhicin caadada dhiiggu 6=dii toddobaad ee ugu dambeeyay isla markaana aad ka walaacsan tahay in uur aad qaadday, iska qaad tijaabo uur qaadista lagu ogaanayo. Haddii aan waxba jirin uma baahnid tijaabinno dheeri ah, haddii aadan lahayn calaamado kale oo muujin karaya uur inaad leedahay (tusaale ahaan, lalabbo, daal daran ama naaso koboc). Haddii caadada dhiigu kaa joogsato inta aad isticmaaleyso aaladda Jaydess®, waa inay dib u soo laabataa markii aaladda Jaydess® lagaa saaro.

Aaladda Jaydess® miyey waxyeello u keenaysaa noloshayda xagga galmadaa?

Markii aaladda Jaydess® meshii ku habboonayd laga dhigo makaanka lagama yaabo in adiga ama lamaanahaagu aad dareentaan aaladda inta aad galmada waddaan.

Mustaqbalkaaga iyo aaladda Jaydess®

Khasab miyaa inaan la socdo habka caadadayda dhiig u socoto?

Maaddaama sida muuqata aad ogaan doontid farqi ku imaanaya caadadaada dhiig, waxtar ayey noqon kartaa in lala socdo dhiigga kaa baxaya/dhibco dhibcayntiisa si ay u caawiso adiga iyo ummulisadaada/dhakhtarkaaga inay ula socdaan sida aad ula jaan qaadeyso aaladda Jaydess®. Dhammaadka qoraalkaan waxaad ka heli doontaa xusuus qor caadada dhiigga ah.

Maxaa dhacaya haddii aan goosto inaan carruur dhalo?

Aaladda Jaydess® waxay ilaalisaa uur qaadista ilaa iyo 3 sannadood, laakiin waxaad had iyo goor weydiin kartaa ummulisadaada/dhakhtarkaaga in lagaa saaro. Waad isku deyi kartaa inaad uur yeelatid mar alla markii lagaa saaro aaladda Jaydess®. Dumarka badan oo daraasado shaybaar la mariyey oo doonayey inay uur yeeshaan waxay ku yeesheen 1 sano gudihiis kadib markii aaladda Jaydess® laga saaray, taas oo la mid ah isla heerka dumarka aan isticmaalin dawooyinka ka hortagga dhalamada.

Haddii aad dooneyso inaad uur yeelato

Waxyaabaha la doonayo in tixgelinta la siiyo markii la qorsheynayo uur yeelashada

Hay'adda Cunnada Qaranka Iswiidhan (Livsmedelskverket) waxay ku talinaysaa qaadashada 400 µg oo kiniiniyada (folic acid) maalin kasta laga bilaabo hal bil ka hor bacrinta iyo inta lagu jiro ugu yaraan 12-ka toddobaad ee ugu horreeya uur qaadista. Taana waxaa loola jeedaa in lagu caawiyo loogana hortago xaaladda loo yaqaan (spina bifida) in ilmaha ay ku dhacdo. Xaddi ku filan oo ah kiniiniga (folic acid) muhiimad joogto ah ayuu u leeyahay inta uurka qofka dumarka ahi leeyahay, gaar ahaan ururnaanta dhiigga hooyada iyo ilamaha ku jira horumarkiisa (Livsmedelsverket 2019).

Su'aalaha Had iyo Goor La Is-weyddiiyo

Ma isticmaali karaa aaladda Jaydess® haddii aanan weli imo dhalin?
Haa, laakiin maahan tani habka ugu horreeya ikhtiyaarka ah ee dumarka aan dhalin sababo la xiriira xaddidnaan shaybaar awgeeed.

Ma isticmaali karaa aaladda Jaydess® xilliyo u dhexeeya ilmo dhalista?
Haa. Ugu horaan aaladda Jaydess® la isku xiraa waa 6 toddobaad ka dib markii qofka dumarka ahi ilmo dhalo hadana ka dib waxay gacan ka geysataa iska ilaalinta uur qaadista ilaa iyo 3 saddex sannadood. Waad isku deyi kartaan inaad uur yeelataan mar alla markii ummulisadaada/dhakhtarkaagu kaa saaraan aaladda Jaydess®.

Miyaa aaladda Jaydess® laga helaa ka hortag cudurrada galmada lagu kala qaado?
Maya. Aaladda Jaydess® waxaa loo isticmaalaa in la isaga difaaco uur qaadista an la dooneynin isla markaana lagama helo iska difaacis ku saabsan cudurrada galmada lagu kala qaado, oo ay ka mid yihiin HIV-ga iyo AIDS-ka. Waxaa muhiim ah inaad isticmaasho cinjirka galmada si aad iskaga difaacdo Cuduurada Galmada lagu Kala Qaado (STDs).

Maxaa dhici doona haddii aan qabo cudurrda galmada lagu kala qaado?

Haddii aad ka shakisan tahay inuu ku asiibay cudurka galamada lagu kala qaado intaan isticmaaleyso aaladda Jaydess®, la xiriir markiiba ummulisadaada/dhakhtarkaaga. Waa inaad iska ilaalisaa galmada ilaa iyo inta aad kala xiriirayso adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaad.

Maxaa dhacaya haddii aan uur yeesho inta aan isticmaalayo aaladda Jaydess®?

Halista ina aad uur qaaddid inta aad isticmaaleysi aaladda Jaydess® aad ayey u yar tahay, laakiin way dhici kartaa. Xaqiiqda ah in aadan helin dhiig bixistii caadada marka aad isticmaaleysi aaladda Jaydess® macnaheedu caadi ahaan maahan in aad uur leedahay. Haddii aadan helin caadadii kugu dhici jirtay xilligeeda isla markaana aad yeelato calaamado kale oo muujin karaya inaad uur leedahay (tusaale ahaan lallabo, daal daran, naaso koboc) waa inaad si toos ah ugala hadashaa arintaas ummulisadaada/dhakhtarkaaga. Haddii aad uur yeelato, waxaa jira halis ah boqolkiiba 50% in uur qaadistu ka jirto dibedda makaanka.

Calaamadaha soo socda iyo muuqaalladaan ayaa muujin karaya uur qaadis ka dhacda dibedda makaanka:

- Markii muddadii caadadu ku hayn jirtay ay dhammaato isla markaaba markiiba uu kaa yimaado dhiigbax iyo xanuun caloosha ah.
- Markii uu ku hayo xanuun daran oo aan kala go' lahayn kaana ahyo gumaarka.
- Markii aad leedahay calaamadaha caadiga ah ee lagu garto uur qaadista laakiin sidoo kale aad dhiig baxayso isla markaana dareento jah wareer.

Haddii aad dareento mid ka mid ah waxyaabaha aan kor ku xusnay, waa inaad si toos ugala hadashaa arintaas ummulisadaada/dhakhtarkaaga.

Ma iska saari karaa aaladda Jaydess® ka hor intaysan ku jirin meesha 3 sannadood?

Haa. Waxaad weydiisan kartaa ummulisadaada/dhakhtarkaaga inuu kaa saaro aaladda Jaydess® waqti kasta oo loo baahdo.

Ma isticmaali karaa suufka dhiigga celiya inta uu igu jiro Jaydess®?

Haa, laakiin ka taxaddar markii aad iska bixinaysid suufka si aadan u soo jiidin miiqyada dunta ah ee ku laxaamadan aaladda Jaydess®.

Aaladda Jaydess® miyay dibadda u soo "dhici" kartaa?

Aaladda Jaydess® qayb ahaan ama gebi ahaanba way u soo dhici kartaa dibad, laakiin waa wax aan badanaa dhicin. Haddii aad aamminsan tahay in dhiigga kaa baxayaa uu aad uga culus yahay kii caadiga ahaan jiray, waxay noqon kartaa calaamad ah in aaladdii Jaydess® ay bannaanka u soo baxday (qayb ahaan ama gebi ahaanba). Haddii aaladda Jaydess® ay bannaanka u soo baxdo wax kaa sii difaacaya uur qaadistu ma jiraan. Waa inaad iska ilaalisaa galmada ama isticmaashaa cinjirrada galmada loo xidho isla mrkaana aad la tashi ugu tagtaa ummulisadaada/dhakhtarkaaga.

Aaladda IUD miyey keentaa miisan koror?

Daraasaduhu waxay muujinayaan in aysan jirin wax farqi ah oo miisaan koror oo ku saa'idaya dumarka lagu xidho aaladda (IUD) marka la barbar dhigo dumarka iyagu isticmaala kiniiniyada ka hortagga dhalmada iyagoo aan wadan wax hoormoonno ah (sida, maarta wareegga ah).

Maxay tahay sababta giraangirta silfarka ahi ugu xiran tahay aaladda Jaydess®?

Tani waxay u suura gelisaa shaqaalaha daryeelka caafimaadka ku xeel dheer inay u kala soocdo aaladda Jaydess® iyo mareegyada kale ee wareegsan markii ay sameynayaan tijaabada raajada (ultrasound) makaanka lagu fiiriyo. Giraanta silfarka ahi waa wax aan xasaasiyad lahayn laakiin haddii aad xasaasiyad ku qabtid waa inaad u sheegtaa ummulisadaada/dhakhtarkaaga.

Maxay yihiin lahannada ay keento aaladda Jaydess®?

Sida daaweyn qaadashada kale, waxaad dareemi kareysaa wax xoogaa lahanno ah markii lagugu xiro aaladda Jaydess®. Hoos waxaa ku yaal liiska int badan lahannada ka dhasha ee dumarka ka soo sheegeen markii la isticmaalyo aaladda Jaydess®. Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah, waxaad ka akhrisan kartaa waxyaabo badan xirmada ku lifaaqan buug yaraha ama wac ummulisdaada/ dhakhtarkaaga.

Aad ayey caadi u tahay (in saameyn ay ku reebto in ka badan 1 tobankii 10-kii isticmaale)
Madax wareer, xanuun ubucda iyo aagagga ilmo galeenka ah, finan/jmaqaarka oo dufan yeesha, is beddelo ku yimaada hannanka dhiigga caadada, ugxan sidaha oo qoyaan yeesha, hurgun unugyada taranka ah ama siilka.

Waa caadi (in saameyn ay ku reebto in ka badan 1 tobankii 10-kii isticmaale)
Xaalad murugo/murugo, dhan wareer, lalabo, infekshan ku dhaca unugga taranka, caadada oo lagu xanuusado, xanuun/xasil darro naasaha ah, aaladda oo soo baxda, timaha oo gurma, dheecaan siilka ka soo daata.

Jaydess® Xusuus qorka caadada dhiigga

Fadlan isticmaal xusuus qorka caadada dhiigga ee ku yaal bogga soo socda si aad ula socotid wixii dhiig bax ah ama dhibco dhibcayn ah ee laga yaabo inay dhacaan bilaha soo socda. Maskaxda ku hay in qof walba oo dumar ah arrintu naadir u tahay isla markaana qaabka caadada dhiiggu kaaga timaaddo inay qofka kale ka duwanaan karto.

Talo siin:

- Ku muuji dhibic (•) markii dhiig buxu dhibco dhibcayb yahay.
- Ku muuji dhibic X markii caadadu si caadi ah u socoto.
- Sanduuqa oo idil buuxi (■) markii caadada dhiiggu ay culus tahay.
- Sanduuqa u daaya marnaan markii aadan dhiig baxaynin.

Ku war geli dhakhtarkaaga ballan kasta oo ugu tegayso in aad isticmaasho aaladda Jaydess®

Jaydess®, intrauterine device, 13.5 mg levonorgestrel

Muujinno: Waa ka hortag dhalmo. Lahanno: madax wareer,xanuun gumaarka/ aagga unugga taranka h, mnabarro/maqaarka oo saliid yeesha, xaalad gad gaddoon iyo isbeddelo dhiib bixista caadada ah qaabkeeda. Digniino/taxaddar: Jaydess® waa in loo isticmaalaa si taxaddar leh ama la iskaba saaraa, ka dib markii lala tashado xeel dheere aqoon u leh, haddii mid ka mid ah xaaladaha soo socdaa ay jiraan ama ay soo baxaan marka ugu horreysa: madax wareer aad u daran, dhan jab aad u daran oo wata aragti lumin, cudurka indha caseeyaha, dhiig karka, dhiig furanka ama wadne weerarka. Dumarka iyagu daneynaya inay gashadaan aaladda Jaydess® waa in loo sheegaa loogana war bixiyaa calaamadaha iyo muuqaallda, iyo halista uur qaadista makaanka dushiiis ah. Dumarka iyagu aan weli wax dhalin waxaa loo heegayaa in aaladda Jaydess® aysan ahayn habka dhalmada looga hortago ee u noqon kara ikhtiyaarka koowaad maaddaama khibradda shaybaar ahaaneed ay xaddidan tahayi. Haweenka qaar ee u isticmaala ka hortaga uurka hormoonnada ayaa soo sheegay niyad jab ama diiqad. Haddii aad leedahay isbeddelo niyadda, la xiriir umulisadaada ama takhtarkaaga.
Contraceptive G02BA03. Rx. F.
Wixii macluumaad dheeri ah, ka eeg xirmada buug yaraha iyo websaydhka ah www.fass.se
SPC 2019-07-01▼ Qalabkaan daaweynta ahi waa mid shuruud ilaalineed oo dheeraad ahi la socoto.

Bayer AB, Box 606, 169 26 Solna, tel 08-580 223 00

PP-JAY-SE-0006-1 JAN 2020

JANAAYO	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19	20	21	22	23	24	25	26	27	28	29	30	31
FEEBARAAYO	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19	20	21	22	23	24	25	26	27	28			
MAARSO	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19	20	21	22	23	24	25	26	27	28	29	30	31
ABRIIL	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19	20	21	22	23	24	25	26	27	28	29	30	
MEEY	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19	20	21	22	23	24	25	26	27	28	29	30	31
JUUN	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19	20	21	22	23	24	25	26	27	28	29	30	
JUULAAY	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19	20	21	22	23	24	25	26	27	28	29	30	31
AGOOSTO	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19	20	21	22	23	24	25	26	27	28	29	30	31
SIBTEEMBAR	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19	20	21	22	23	24	25	26	27	28	29	30	
OKTOOBAR	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19	20	21	22	23	24	25	26	27	28	29	30	31
NOFEEMBAR	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19	20	21	22	23	24	25	26	27	28	29	30	
DISEEMBAR	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19	20	21	22	23	24	25	26	27	28	29	30	31